XAFIISKA AGAASIMAHA
Kate Brown, Gubanatooraha ama Badhasaabka

500 Summer St NE E20
Salem OR 97301
Codka: 503-947-2340
Faakiska: 503-947-2341

# Hagida loogu talagalay Goobta lagu Bixinayo Tallaalka COVID-19 iyo Bixiyaha Tallaalka

**Taariikhda Dhaqangalka:** Maajo 19, 2021

**Maamulka:** ORS 431A.010, ORS 431A.015, ORS 433.441, ORS 433.443.

Khusaynta: Hagidan waxay khuseeysaa qof kasta oo ay furan tahay goob lagu bixiyo tallaal ama shaqaale ka qorayo goob tallaal, halkaasi lagu bixiyo tallaal ay FDA ansixisay oo loogu talagalay COVID-19, oo ay ku jiraan farmasiyada, rugaha caafimaadka, ama goobaha kale ee aan daryeelka caafimaadka ahayn.

**Qeexitaano:**Qeexitaanada soo socda ayaa laga yaabaa inay quseeyaan:

- "**ALERTIIS**" waxaa loola jeedaa diiwaanka tallaalka gobolka oo dhan ee Maamulka Caafimaadka ee Oregon, oo lagu hoos aasaasay ORS 433.094
- **"Qofka ka shaqeeya goobta lagu bixiyo tallaalka COVID-19"**waxaa loola jeedaa shaqsi, hay'ad, ama dawlad-goboleed ama degmo mas'uul ka ah hawlgallada iyo waxqabadyada goobta tallaalka COVID-19 uu ka dhacayo.
- **"Bixiye"** waxaa loola jeedaa:
  - Shakhsi ama hay'ad saxiixday Heshiiska Bixiyaha Barnaamijka Tallaalka COVID-19 ee CDC (bixiyaha diiwaangashan); iyo
  - Qof bixinaya tallaalka COVID-19.
- **"Shaqaale"** waxaa ku jira shaqaalaha, qandaraaslayaasha iyo mutadawiciinta.

## Hawlgalka Goobta Tallaalka

**Qofka ay furan tahay goobta lagu bixiyo tallaalka COVID-19 waxaa looga baahan yahay inuu:**

- Leeyahay qof loo xilsaaray inuu noqdo isku-duwaha goobta.
- Xaqiijiyo in bixiyeyaasha joogo goobta iyo goobtaba ay u hoggaansamayaan:
  - Hagida Maareynta Tallaalka COVID-19 ee Maamulka Caafimaadka ee Oregon
  - Hagida Takoor La'aanta Goobta Tallaalka COVID-19, ADA iyo Helida Luqadda

- Meelo la arki karo ku dhejiyaa calaamado wato macluumaadka xiriirka ee isku-duwaha goobta, si dadku u ogaadaan cidda lala xiriirayo haddii ay jiraan wax welwel ah oo ku saabsan goobta ama adeegyada la bixiyo.
- Dadka goobta ka qaatay garoojadooda koowaad ee tallaalka goobta siiyaa taariikhda iyo waqtiga ay u soo noqonayaan garoojada labaad ee tallaalkooda, haddii ay khuseyso.
- Qofka la tallaalay siiyaa kaarka tallaalka oo muujinaya ugu yaraan taariikhda la qaatay tallaalka COVID-19, meesha laga qaatay tallaalka, iyo tallaalka la qaatay.
- Qaado dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo hubiyo in aysan jirin garoojooyin tallaal oo ku hara dhalada tallaalka taasi oo keenayso dayaca tallaal dadka loo diiday.
    - Qofka ay furan tahay goobta lagu bixiyo tallaalka COVID-19:
        - Waa inuu hubiyo in ballamaha tallaalka si habboon loo qabsaday si aysan u jirin garoojooyin tallaal oo soo hara, iyada oo la tixgelinayo sicir-la’aanta iyo tixgelinada kale ee hawlgalka.
        - Waa inuu sameeyo liiska sugitaanka oo wato macluumaadka xiriirka ee dadka u qalma tallaalka, iyo dadka imaan kara goobta iyadoon ogeysiis hordhac la haysan.
        - Waa inuu siiyaa daawooyinka haraaga ah ee ku jira dhalada tallaalka qof kasta oo ah da' u-qalanto oo aan la tallaalin, si kasta oo suuragal ah

    *** ***In kasta oo ay tahay inaad talaabooyin qaado si aad iskaga ilaaliso inaad dacaydo garoojooyinka tallaalka, bixiyeyaasha iyo goobaha waa inay mudnaanta siiyaan in qof la tallaalo hadda xitaa haddii taasi ay ka dhigan tahay inaadan awoodin inaad isticmaasho dhammaan garoojooyinka ku jira dhalada.***

**Qofka ay furan tahay goobta lagu bixiyo tallaalka COVID-19, iyo shaqaalaha goobta tallaalka waxaa laga mamnuucay:**

- Weydiinta, ama laasimida, caddeynta u-qalmitaanka tallaalka inta lagu jiro jadwalaynta ama la joogo goobta.
    - Shaqaalaha goobta lagu bixiyo tallaalka COVID-19 waxay weydiin karaan qofka doonaya in la tallaalo inuu isagu caddeeyo inuu kujira qayb hadda u-qalanto tallaalka waxayna weydiin karaan qofka wejiga ama kooxda uu kujira iyadoo ujeeddooyinka yihiin caawinta go'aaminta horumarka gobolka uu sameeyay marka la eego tallaalista shaqsiyaadka u qalma tallaalka.
- Xaddidida tallaalka COVID-19 qayb ka mid ah dadka u-qalma in tallaalka loo qoondeeyay bixiye diiwaangashan iyada oo ujeedadu tahay in tallaalka la siiyo dad khatar gaar ah ugu jira cudurka oo ay adag tahay in la gaarsiiyo tallaalka, ama in goobta tallaalka ay tahay rugta tallaal oo loo-shaqeeye martigalinayo, taasi oo tallaalka lagu xadidi karaa keliya dadkaas ama shaqaalaha.
    - Haddii tallaallada loo xaddiday sida kor lagu fasaxay, qayb ka mid ah kuwa u-qalma tallaalka, goobta waa in lagu dhejiyo calaamado waadax ah, iyo isgaarsiin

kale oo xayeysiin ah, oo sheegayo cida lagu tallaali kara goobta iyadoo la raacayo qaybaha u-qalmitaanka.

- Weydiinta qofka doonaya in la tallaalo inuu bixiyo lambarka sooshiyaal sekiyuuritiga.
  - Goobtu waxay dooran kartaa inay weyddiiso lambarka sooshiyal sekiyuuritiga si ay biilka ugu dalacdo caymiska qofka, laakiin waa inay caddeysaa in bixinta lambarka sooshiyal sekiyuuritiga ay tahay mid ikhtiyaar ah oo loo isticmaali doono oo keliya ujeedooyinka ku aadan in biilka lagu dalaco caymiska oo aysan ahayn wax shardi u ah qaadashada tallaalka.
- U diidida tallaalka COVID-19 qof u-qalmo iyadoo lagu saleynayo in qofkaas:
  - Uusan lahayn caymis;
  - Uu yahay muwaadinka dal kale;
  - Uu degan yahay gobol kale; ama
  - Uu degan yahay degmo kale.
- In qofka doonaya in la tallaalo laga qaado lacag ku aadan tallaalka ama khidmad ku aadan siinta tallaalka.
  - Bixiye ayaa ku dallaci kara caymiska khidmadda siinta tallaalka laakiin ma ku dallaci karo qofka doonaya in la tallaalo.
- In qofka looga baahdo inuu bixiyo:
  - Caddaynta macluumaadka caymiska caafimaadka (macluumaadkan waa la codsan karaa laakiin ma ahan karo shardi waana in la caddeeyaa in bixinta macluumaadka ay ikhtiyaar tahay).
  - Aqoonsiga ay dowladda siisay qofka.
- Ku laasinka ogolaanshaha waalidka ama masuulka oo da'da carruurta yar 15 illaa 17 oo ku dhaqmayo xaquuqdooda lagu ogolaanayo daaweynta sida waafaqsan ORS 109.640 (oo quseeyo dhaqaatiirta, dhaqaatiirta daawada, dhaqaatiirta ilkaha, caawiyayaasha dhaqaatiirta, kaaliyayaasha dhaqaatiirta iyo dhaaatiirta indhaha).

**Qofka ka shaqeynayo goobta maamulka tallaalka ayaa si xoogan lagula talinayay inay:**

- Waqtiga jadwalaynta ballanta tallaalka, inuu uruuriyo macluumaad ku saabsan in qofku u baahan yahay hoy naafonimo darteed ama inuu u baahan doona tarjumaad ama turjumidda dukumiintiyada qoran.
- Inuu yeesho nidaam ay ballan ku qabsadaan dadku aan haysan kombuyuutar ama interneet.
- Inuu yeesho nidaam ay ballan ku qabsadaan dadku ay kugu adag tahay isticmaalka kombuyuutarka ama gelista interneetka.
- Inuu horey ugu sii sheego dadka nooca tallaalka ee lagu bixin doono goobta.
- Bixiyo macluumaad waadax ah oo ku saabsan in qaadashada tallaalka COVID-19 aan loo tixgelin doonin ujeedo ah Qiimeynta Lacagta Dadweynaha.

- Inuu xaashida macluumaadka v-safe siiyo qaatayaasha / daryeelayaasha talaalka kuna dhiirigeliyo kuwa qaata talaalka inay kaqeybqaataan v-safe.
    - V-safe waa aalad cusub oo ikhtiyaari ah oo ku saleysan taleefannada casriga ah oo adeegsata farriimaha qoraalka iyo xog-uruurinta websaydhka si loola socdo dadka la tallaalay oo loo aqoonsado waxyeellada iman kara kadib tallaalka COVID-19. V-safe wuxuu weydiiyaa su'aalo ka caawinaya CDC la socodka badbaadada tallaalada COVID-19. V-safe wuxuu sidoo kale bixiyaa dabagalka taleefanka ee tooska ah ee ay sameyso CDC haddii kaqeybgalayaashu ay soo sheegaan saameyn caafimaad oo weyn kadib talaalka COVID-19. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo: www.cdc.gov/vsafe.

## Shuruudaha loogu talagalay Bixiyeyaasha Tallaalka COVID-19: Macluumaadka Talaalka oo lala Wadaagayo Dadka Qaadanayo Tallaalka ama Daryeelayaashooda

- FDA iyo CDC waxay go'aamiyeen in tallaallada la oggolaaday ee COVID-19 ay yihiin kuwo badqab ah oo waxtar leh. Si kastaba ha noqotee, aad ayey muhiim u tahay shakhsiyaadka inay fahmaan halista iyo faa'iidooyinka tallaalka COVID-19 ee ay tqaadanayaan iyo inay helaan fursad ay su'aalo ku weydiiyaan. Bixiyeyaasha tallaalku waa inay ku bixiyaan macluumaadka si waafaqsan xaashida Xaqiiqda Tallaalka COVID-19 ee Qaatayaasha iyo Daryeelayaasha waana in macluumaadka ku qoran yahay luqadda koowaad ee shaqsiga ama qaab uu shaqsiga fahmi karo, iyadoo la tixgelinayo aqoonta luqadda Ingiriisiga iyo baahiyaha marin u helida ee Sharciga Dadka Naafada ah ee Mareykanka.

### Johnson & Johnson Tallaal

- Bixiye kasta oo bixinayoa tallaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson (oo sidoo kale loo yaqaan tallaalka Janssen) waa inuu hubiyaa in shakhsiyaadka ama daryeelayaashoodu ay si gaar ah u fahmaan digniinta cusub ee la xidhiidha tallaalka Johnson & Johnson. Macluumaadkan waa in lagu bixiyaa luuqada koowaad ee shakhsiga ama qaab shaqsiga uu fahmi karo, iyadoo la tixgelinayo aqoonta luuqada Ingiriisiga iyo baahiyaha shakhsiyaadka naafada ah ee ubaahan kara hoy marka la eego Sharciga Dadka Naafada ah ee Mareykanka. Macluumaadka digniinta ee cusub ayaa lagu daray Xaashida Xaqiiqda ee Qaatayaasha iyo Daryeelayaasha ee ay ansixisay FDA.
- Adiga oo ah bixiyaha tallaalka, ***waa inaad siisaa qofka qaadanayo ama daryeel bixiyahooda,*** macluumaad la jaanqaadaya "Xaashida Xaqiiqda ee Qaatayaasha iyo Daryeelayaasha" (oo aad siisaa qofka nuqulka macluumaadka ama inaad ku hagtaa shakhsiyaadka websaydhka), www.janssencovid19vaccine.com, si ay u helaan Xaashida Xaqiiqda) kahor inyta uusan qofka qaadan tallaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson, oo ay ku jiraan:
    - FDA waxay oggolaatay isticmaalka degdegga ah ee Tallaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson, kaasi oo aan ahayn tallaal ay ansixisay FDA.
    - Qaataha ama daryeel bixiyahoodu waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay aqbalaan ama diidaan tallaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson.

- Khataraha iyo faa'iidooyinka muhiimka ah ee la ogyahay iyo kuwa iman kara ee tallaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson, iyo khataraha iyo faa'iidooyinka noocan ah ee aan la garanayn.
- Macluumaadka ku saabsan tallaalada kale ee la heli karo iyo halista iyo faa'iidooyinka kuwa kale.

Wixii ah macluumaadka ku saabsan tijaabooyinka caafimaad ee tijaabinaya isticmaalka tallaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson si looga hortago COVID-19, fadlan eeg www.clinicaltrials.gov.

- Bixiyeyaasha daryeelka caafimaadku waa inay fahmaan macluumaadka digniinta ee ku saabsan tallaalka Johnson & Johnson waana inay yaqaanaan ogaanshaha iyo daaweynta cudurka xinjirowga dhiiga. Kuwa soosocda waa macluumaadka digniinta ee cusub ee laxiriira talaalka Johnson & Johnson oo lagu daray Xaashida Xaqiiqda ee Bixiyeyaasha Daryeelka Caafimaadka:

  **Cudurka Xinjirowga Dhiigga**
  Warbixinnada dhacdooyinka xunxun ee ka dhasho isticmaalka tallaalka COVID-19 ee Janssen ee hoos imaadda oggolaanshaha isticmaalka degdegga ah waxay soo jeedinayaan halista cudurka xinjirowga dhiigga oo sii kordheysa oo ku lug leh xinjirowga dhiiga maskaxda iyo goobaha kale (oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn xididdada dhiigga ee waaweyn ee ubacda iyo xididdada lugaha) oo ay la jirto dhiig-baxa jirka iyo bilowga calaamadaha qiyaastii hal ilaa laba toddobaad tallaalka kadib. Xaaladaha badankood ee cudurka xinjirowga dhiigga ayaa la soo sheegay ka dib tallaalka COVID-19 ee Janssen ayaa waxay ku dhaceen dumarka da'doodu tahay 18 illaa 49 sano; qaar baa dhintay. Hab-socodka dhacdooyinkan waxay la wadaagaan astaamo xinjirowga ka dhasho heparin. Shakhsiyaadka looga shakisan yahay cudurka xinjirowga dhiigga ka dib Tallaalka COVID-19 ee Janssen, isticmaalka heparin wuxuu noqon karaa mid waxyeello leh waxaana loo baahan karaa daaweyn kale. La-tashiga khabiirada cudurada dhiigga ayaa si xoogan loogu talinayaa. Bulshada Mareykanka ee Cudurada Dhiiga waxay daabacday tixgelinno laxiriira ogaanshaha iyo daaweynta cudurka xinjirowga dhiiga kadib Tallaalka COVID-19 ee Janssen ( https://www.hematology.org/covid-19/vaccine-induced-immunethrombotic-thrombocytopenia). (eeg Warbixinta Buuxda ee Qoraalka ee EUA).

**Qof kasta oo bixinayo tallaalka COVID-19 waxaa si xoogan lagugula talinayaa inuu:**

- Ogolaansho qoraal ama hadal ah ku qoro shaxda caafimaad ee shaqsiga ama faylka caafimaad ee qarsoodiga ah kaasi oo qayb ka ah diiwaanada shaqada ee shaqaalaha, hadii ay khuseyso, kaasi oo muujinaya in halista iyo faa'iidooyinka la xiriira ee lagala hadlay shakhsiga ama wakiilka daryeelka caafimaad ee sharci ahaan la oggol yahay.
- Siiyo shakhsiga ama wakiilka daryeelka caafimaad ee sharciyan la oggol yahay turjumaan si loo hubiyo in dhammaan macluumaadka la bixiyay lagu heli karo luqadda koowaad ee qofka, oo ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha ee Mareykanka haddii loo baahdo, iyo inuu xaqiijiyo in dhammaan dukumintiyada qoran si habboon loo turjumay. Tusaalaha foomka ogolaanshaha xog-ogaalka ah oo qoran ayaa halkaan laga heli karaa waxaana halkan laga heli karaa tusaalaha foomka diiwaangelinta bixinta tallaalka COVID-19. Oggolaansho qoran looma baahna laakiin waa la heli karaa.

- Siiyo qofka qaata tallaalka, ama wakiilkooda daryeelka caafimaad ee sharci ahaan la oggol yahay xulashada la-tashiga shaqaalaha caafimaadka dhaqameed ama wakiil kale ee bulsheed oo lagu kalsoon yahay. Hay'adda Caafimaadka Oregon waxay leedahay diiwaan dhaqameed oo loogu talagalay shaqaalaha caafimaad haddii adeeg bixiyuhu daneeynayo inuu helo shaqaale caafimaad dhaqameed oo lala tashado inta lagu guda jiro tallaallada. Eeg Dhigaalada hoose.

**Bixiyeyaashu waxay macluumaadka xaashida tallaalka Johnson & Johnson ku bixin karaan hadal ahaan, in kasta oo OHA ay ku talinayso in la qoro wadahadalka.**

Wixii ah shuruudaha dheeraadka ah iyo talooyinka loogu talagalay bixiyeyaasha tallaalka iyo goobaha tallaalka fadlan dib u eeg dukumintiga soo socda ee hagitaanka OHA:

- Goobta Tallaalka COVID-19 ee Takoor la'aanta, ADA iyo Hagida Helitaanka Luqadda.

## Usoo sheegida Macluumaadka Tallaalka Maamulka Caafimaadka Oregon

**Qof kasta oo tallaalka COVID-19 ka bixinayo gudaha Oregon ayaa looga baahan yahay inuu:**

- Ururiyo dhammaan macluumaadka loo baahan yahay in lagu soo wargeliyo ALERTIIS, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn macluumaadka jinsiyadda iyo isirka ee shakhsiyaadka la tallaalayo.
- ALERTIIS kaga soo warbixiyo macluumaadka maamulka si waafaqsan Xeerarka Maamulka Oregon Cutubka 333, Qaybaha 47 iyo 49. Wixii ah macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan soo sheegista shuruudaha iyo tababarka, booqo https://www.oregon.gov/oha/PH/PREVENTIONWELLNESS/VACCINESIMMUNIZATION/IMMUNIZATIONPROVIDERRESOURCES/Pages/COVIDvaccine.aspx.

## Warbixinta Qasabka ah ee Dhacdooyinka Halista ah ee Xunxun

**Qof kasta oo tallaalka COVID-19 ka bixinayo gudaha Oregon ayaa looga baahan yahay inuu:**

- Iyadoo la raacayo sharciga federaalka, u soo sheego dhacdooyinka halista ah ee xunxun (iyadoon la eegan u nisbinta tallaalka) Nidaamka Ka Warbixinta Dhacdada Daran ee Tallaalka (VAERS). Ku buuxi ku soo gudbi warbixinnada VAERS khadka tooska ah ee internetka https://vaers.hhs.gov/reportevent.html.

**Wixii ah macluumaad dheeri ah oo laxiriira shuruudaha warbixinta qasab ah, fiiri Xaashida Xaqiiqda ee Bixiyeyaasha Daryeelka Caafimaadka ee Bixinayo Talaalka ee loogu talagalay talaal kasta oo gaar ah taasi oo laga heli karo websaydhka FDA halkan:** https://www.fda.gov/emergency-preparedness-and-response/coronavirus-disease-2019-covid-19/covid-19-vaccines

## Dib-u-qoondaynta Alaabada

Bixiye kasta oo qoondeyn garoojooyin labaad ah ka helay Maamulka Caafimaadka Oregon waa inuu keydiyaa ugu yaraan 6 usbuuc si loo hubiyo in shaqsiyaadka ay haystaan waqti ay ugu soo laabtaan garoojadooda labaad. Bixiyaha tallaalka wuxuu qoondeynta garoojooyinka

labaad u isticmaali karaa sidii garoojooyin koowaad kadib markuu sugo ugu yaraan 6 usbuuc si loo hubiyo in shaqsiyaadka ay haystaan waqti ay ugu soo laabtaan garoojadooda labaad.

- **Fadlan ogsonow** in xogta OHA ay muujineyso in 4% shaqsi oo dheeraad ah ay helaan garoojadooda labaad inta lagu jiro isbuuca 7-aad ilaa isbuuca 9-aad, iyadoo dhammaystirka garoojada labaad ee gobolka oo dhan uu ka badan yahay 96%.
- Bixiyeyaashu waa inay eegaan ALERT si ay u ogaadaan in shakhsiyaadka ay garoojadooda labaad horey uga qaateen meel kale, haddii ay sidaasi dhacdana garoojooyinkaasi dib ayaa loo qoondeyn kara kahor 6 toddobaad.
- Haddii goob lagu bixiyo tallaalka ay go'aamiso baahi loo qabo in dib loo qoondeeyo garoojooyinka labaad ee aan la isticmaalin 6 toddobaad kadib, OHA waxay ku talineysaa in kala bar garoojooyinka loo qoondeeyo kuwa koowaad iyadoo qeybta kalena laga dhigayo garoojooyinka labaad (tusaale, loogu talagalay dadka hela qiyaasaha ugu badan ee la meeleeyay). Bixiyeyaashu sidoo kale waa inay tixgeliyaan inay keydiyaan tiro yar oo ka mid ah garoojooyinka labaad ee loogu talagalay dadka ka qaatay garoojada koowaad goob aysan dib ugu laaban karin (tus., gudaha xarun aysan dib dambe u degganeyn ama ka baxsan gobolka).
- Goobaha bixiyeya tallaalka waxaa lagu dhiirigelinayaa inay kormeeraan oo maareeyaan alaabadooda si loo hubiyo helitaanka garoojada labaad.

## Ilaalinta Mas'uuliyadda

Sharciga Diyaargarowga Dadweynaha iyo U-diyaargarowga Xaaladaha Degdegga ah (Sharciga PREP), wuxuu ilaalin mas'uuliyad siiyaa "dadka la daboolay" ee ku lug leh dhinacyo badan oo ka mid ah ka-jawaabista COVID-19, waxaana ku jira dadka ka shaqeeya goobta lagu bixiyo tallaalka, iyo bixiyeyaasha iyo shaqaalaha ka shaqeeya goobaha lagu bixiyo tallaalka. . Wixii ah macluumaad dheeri ah booqo: Akhri wax dheeraad ah oo ku saabsan Sharciga PREP.

## Su’aalaha ama Walaacyada?

Haddii aad qabtid su’aalo la xiriira tallaalada COVID-19, fadlan ku soo dir su’aalahaaga mid ka mid ah cinwaanda soo socda, si markaas OHA ay kuu caawiso.

- Guud ahaan su’aalaha tallaalka: ORCOVID@211info.org
- Wixii caawin ee lagu helayo tallaal ama wixii warbixin guud, la xiriir: 211
- Diiwaangelinta bixiyaha tallaalka COVID-19: Vaccine.ProviderEnroll@dhsoha.state.or.us
- Wixii ah cabashooyin la xiriiro helitaanka tallaalka nagala soo xiriir covidvaccine.complaints@dhsoha.state.or.us, ama 877-642-0450 / 503-947-2346

## Khayraadka

- **Websaydka Tallaalka OHA COVID-19:**http://healthoregon.org/covidvaccine
- **OHA COVID-19 en Español:**http://healthoregon.org/vacunacovid.

- **Diiwaanka Shaqaalaha Dhaqameed ee Daryeelka Caafimaadka** https://traditionalhealthworkerregistry.oregon.gov/
- **Diiwaanka Turjubaanka Daryeelka Caafimaadka:**https://hciregistry.dhsoha.state.or.us/
- **Qalabka Isgaarsiinta Muuqaalka:**https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/le2314.pdf
- Daryeelka caafimaadka iyo Waji Daboolashada: Yareynta Xadeynada Isgaarsiinta ee Dhagoolka iyo Bukaanada uu Maqalka Dhibayo
- Tixgelinada Xaquuqaha Rayidka FEMA Inta lagu jiro Dadaalada Qeybinta Tallaalka COVID-19
- Hubinta Helitaanka Luuqada HHS iyo Isgaarsiinta Wax ku oolka ah Inta lagu jiro Jawaabta iyo Soo kabsiga: Liiska warbixinta ee Jawaabayaasha Degdega
- Hagida ADA ee loogu tallogalay Maareeyayaasha Xaaladaha Degdega ah iyo Maamulada Caafimaadka Dadweynaha ee Deegaanka
- Kaararka Isgaarsiinta loogu tallogalay Dadka Aan Hadli Karin

**Helitaanka dukumiintiga:** Shaqsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriiska, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka halkan 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us